

Xeerka Sharciga 18 Luulyo 1962, lamba. 6.

Qorista Ciidanka Xoogga Dalka.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

Markuu arkay qod. 63 ee Dastuurka;
Markuu arkay sharciga 6 Abriil 1960, lamba. 5;
Markuu tixgeliyay Xeerka- Sharci ee 4 Maayo 1960, lamba. 5;
Maarkuu tixgeliyay baahida degdega ah ee loo qabo in la sameeyo xeerar cusub oo ku saabsan qorista askarta qaranka;

Markuu Dhageystay Golaha Wasiirada;
Markuu tixgeliyay soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga;

Wuxuu Xeeriyay

Qod. 1

Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed waxaa loo qorayaa sida shaqaale iskood isu xilqaamay oo kale oo si gaar ah loo ogeysiisay.

Is-diiwaangelinta waxa loo sameeyaa qaab qaran.

Qod. 2

Waxaa loo qorori karaa ciidammada muwaadiniinta Soomaaliyeed oo:

- 1) ku jiro xadka da'da ee lagu sheegay ogeysiiska shaqo qoris kasta;
- 2) leh shuruudaha jir ahaan looga baahan yahay;
- 3) leh akhlaaq wanaagsan;
- 4) aan lagu xukumin xukun xabsi ah ee dembiyo kama' ah.

Qod. 3

Ogeysiisyada ku saabsan shaqo qorista ciidamo muhiim ah oo la xiriira baahida loo qabo in la dhiso qaybo cusub ama qayb u janjeerto ballaarinta xafiisyada ciidamada Qaranka, waxaa lagu soo saarayaa Xeer Ra'iisul Wasaare kadib markii uu soo jeediyo Wasiirka Gaashaandhigga oo ay dhageeysteenna Golaha Wasiirada.

Ogeysiisyada ku saabsan shaqo qorista waa iney ku muujisan tahay:

- 1) nooca shaqada iyo tirada boosaska loo tartamayo;
- 2) xeerarka loogu qaybgalayo tartanka iyo shuruudaha looga baahan yahay;
- 3) hababka lagu hubinayo jirdhiskiisa iyo shuruud kastoo kale oo mudnaanta u leh shaqo qorista;
- 4) Shruudo kasto oo mudnaanta leh ee diiwaangelinta;
- 5) tirada qaybaha qaarkood loo xaddiday;
- 6) Muddada tababarka aasaasiga ah ama waqtiga tababarka;
- 7) caqaadaha waqtiga uu bilaabanaayo tababarka iyo waqtiga uu joogsanaayo;
- 8) Daryeelka dhaqaalaha ee bilowga ah;
- 9) iyo wax kasta oo kale oo faa'iido leh.

Qod. 4

Xulashada codsabayaasha waxaa lagu sameeynaa go'aan aan laga doodikarin ee Guddiga Dhexe ee Shaqo qorista, oo uu magacaabo waqti ka waqti Wasiirka Gaashaandhigga kana kooban:

- Hal Sarkaal Sare oo Ciidan — Guddoomiye;
- Hal Kabtan Ciidanka Xoogga Dalka — Xubin;
- Hal Madaxa Adegga Caafimaadka Ciidanka — Xubin;
- Hal Sarkaal Ciidanka Hoose — Xoghayn;

Guddiga Dhexe ee Shaqo qorista, marka ay u muuqato in ay tahay lagama maarmaan, wuxuu awoodaan inay magacaabaan hal ama wax ka badan oo guddi hoosaadyada oo wareego.

Qod. 5

Marka la diiwaan geliyo, codsabayaashu waxay qaadanayaan dhammaan waajibaadka ka imanaya xaaladdooda cusub, isla markaas, waxay hoos imanayaan sharciyada iyo xeerarka milatariga.

Qod. 6

Marka laga reebo sida uu dhigayo qodobka 3-aad ee Xeerka, Wasiirka Gaashaandhigga waxa uu xaq u leeyahay in uu amar ku siiyo Taliska Ciidanka Qaranka si uu u fuliyo diwaan-gelinta tiro xadidan, si uu u daoolo baahiyaha caadiga ah ee buuxinta shaqaalaha waaxyaha.

Qod. 7

Qodob kasta oo liddi ku ah ama ka horimaanaya qodobbada xeerkan waa la tirtiray.

Qod. 8

Xeerkan ayaa si degdeg ah u dhaqan galaya, waxaana la horgeyn doonaa Golaha Shacbiga si ay sharci ugu rogaan.

Muqdisho, 18 Luulyo 1962.

Aden Abdulla Osman

Ra'iisul Wasaare
Cabdi-Rashiid Cali Shermanke
Wasiirka Gaashaandhiga
Scek Cali Ismail Yaquub